








Ka duwanaanshaha sababta saxda ah

-  LIDA Portugal
-  Sunniva Høiby-Øiset
-  Mohamed Abdirashid
-  4
-  Soomaali



Edson waxa uu ku dhashay Angola, wax yar uun ka dib markii uu dalkoodu xornimada qaatay. Wuxuu ahaa wiil aad u dheer. Dhererkiisa awgeed ayuu kuwa kale kaga duwanaa. Dadkii hubka siin jiray carruurta si ay ugu dagaalamaan askar ahaan dagaaladii sokeeye waxay doonayeen wiilal isagoo kale ah.



Hooyadii waxay ka cabsatay inay kaxaystaan, markaas ayay go'aansatay inay u dirto inuu kula noolaado habaryartii Portugal. Waxay u malaynaysay inuu halkaas ku nabadgeli doono.



Aad bay u adkeyd bilaawgii horre, maadaama Edson uu u xiisay cimilada diiran, cunta dhaqameedka iyo ugu badnaan, laabta gelintii iyo dhunkashada hooyadiis.



Si fiican ugumuu hadli karin luuqada Boortaqiiska, aad ayeyna ugu adkeyd inuu la socdo fasaladiisa iyo la sheekeysiga saaxiibadiis. Waxa uu iswaydiin jiray in ay tahay fikrad wanaagsan in uu yimaado Portugal.



Maalin maalmaha ka mid ah macalin ayaa ogaaday sida uu ugu fiican yahay kubbadda gacanta. Waxa uu ku biiray koox kubadda gacanta ah oo uu aad ugu guulaystay. Waxa uu caan ka noqday iskoolka oo uu yeeshay saaxiibo. Wuxuu kaloo noqday qof kalsooni badan.






Hadda oo uu qaan-gaaray, Edson wuxuu tababaraa carruurta qaxootiga ah iyo kuwa kale ee laga takooro bulshada. Mar, dhererkiisu waxa uu halis galiyay in uu carruurta la askaraynayo noqdo. Hadda, dhererkiisu wuxuu siinayaa awood uu dadka kale ku caawiyo inay dareemaan ammaan.



LIDA Stories

lidastories.net

Ka duwanaanshaha sababta saxda ah

-  LIDA Portugal
-  Sunniva Høiby-Øiset
-  Mohamed Abdirashid

